

## **QoraalXogta Dugsiga Hoose:**

**Tani waa turjumaada Af-Soomaaliga ee wicitaanka Taleefanka ee Dugsiga Hoose ee Diiwaan Galinta kahor oo laguusoo marinaayo Aalada Fariimaha ee Dugsiga taasoo aad ku heli doonto luuqada Ingiriiska:**

**Tani waa fariin aad muhiim ah oo kaaga timid Golaha Degmo Dugsiyeedka Toronto looguna talagalay cunugaaga galaaya fasalka (fasalka cunugu dhigan doono) bishaan Sibteembar. (Waxaad helaysaa hal wicitaan halkii cunug ba mid kasta oo kamid ah carruurtaada. Wicitaannada waxaa lagu aqoonsan doonaa fasalka ardaydu dhigtaan.)**

Wasaarada Waxbarashada ayaa ku dhawaaqday in dugsiyada hoose ay ku laaban doonaan dugsiga shan maalmood asbuucii ayadoo ardaygu ku jiraayo hal koox maalintii oo dan iyo talaabooyinka caafimaadka iyo badqabka oo kor loo qaaday.

Ayadoo la raacaayo Talooyinka Caafimaadka Dadwaynaha Toronto ee ku xeeran kala fogaanshaha dadka, TDSB ayaa abuurtay istaraatiijiyad lagu xaqiijinaayo in xajmiyada fasalka ee ku xeeran nidaamka la yarayn doono sida ugu badan ee suuragalka ah ayadoo sidoo kale diirada la saaraayo ilaha bulshooyinka xogta caafimaadku muujinayso inuu ku badan yahay COVID-19. Shaqaalaha ayaa la shaqaynaaya Waaxda Caafimaadka Toronto si loo go'aansho dugsiyada u baahan ilaha dheeraadka ah.

Haddii aad doorato inaad cunugaaga usoo dirini waxbarashada dugsiga la tagaayo bisha Sibteembar, qaabka gabi ahaanba oonleenka ah ayuu cunugaagu heli doonaa asagoo guriga jooga ayadoo la adeegsanaayo Waxbarashada Oonleenka ah ee Dugsiga Oonleenka TDSB. Waxbarashada oonleenka ah waxaa lagu bixin doonaa qaabka waxbarashada oonleenka ah ee caadiga ah maadaama aan la hayn ilo dheeraad ah oo qaabka waxbarashada dugsiga ee gaarka ah lagu bixinaayo.

Waa in dugsigaagu abuuraa liiska fasalka ee Sibteembar, marka waxaan kaa codsanaynaa inaad cunugaaga ka qorto hadda dugsiga tooska ah (tani waxay ka dhigan tahay inuu dugsiga tagaayo) ama waxbarashada oonleenka ah (waxay ka dhigan tahay oonleen buu wax ku baranayaa).

- 1) Sida uu dugsiga ugu laaban doono cunugaagu bisha Sibteembar:

Riix 1 si aad u doorato "Cunugaygu waa imaan doonaa dugsiga"

Riix 2 si aad u doorato "Cunugaygu wuxuu dugsiga Ku dhigan Doonaa Qaabka Oonleenka ah"

Waad kumahadsan tahay isdiiwaan gelinta. Fadlan booqo webseetkeena oo at [www.tdsb.on.ca](http://www.tdsb.on.ca) si aad u hesho wararkii ugu danbeeyay iyo xog ku saabsan talaabooyinka xigga.